




WARQADDA WARBIXINTA QORSHAHA DEJINTA MY

*Waraqda asalka ah waxaa soo saaray Xarunta Sharciga ee
Danaha Dadweynaha*



THE AIRE CENTRE
Advice on Individual Rights in Europe

**Public Interest
Law Centre**

31da Oktoobar ee 2019, Boqortooyada Midawga Ingriiska (UK/BMI) way ka bixi doontaa Midawga Yurub (EU/MY). Muwaadiniinta MY waxaa looga baahnaan doonaa inay dalbadaan 'xaaladda degan' hadday rabaan inay joogaan BMI. Nidaamka isdiwaangelinta wuxuu furnaan doonaa illaa iyo 30 Juun 2021da. Haddii aysan jirin wax heshiis ah oo ka dhaxeeya MBI iyo MY, nidaamka is diiwaangelinta wuxuu ku ekaan doonaa 31da Disembar ee 2020. Warqaddaan warbixinta waxay ku saabsan tahay sida loo dalbado 'xaaladda deggan' iyo waxaad xaqa u leedahay haddii lagu oggolaado sharcigan. Hadaad haysato su'aalo aan looga jawaabin warqaddan warbixinta, waa inaad raadsato talo kale. Waxaad Xarunta AIRE kala soo xiriiri kartaa macluumaadka xiriirka ee hoosta warqaddan ku qoran.

Yaa dalban kara?

- Muwaadiniinta MY
- Muwaadiniinta aan ahayn MY ee haysta kaarka degganaansho biyometrik ama kaarka degganaansha rasmiga ah ee hoos imanaya Xeerarka Socdaalka (ADY/EEA) ee 2016 (codsi la sameeyay ama ka dib 6 Abriil 2015)
- Xubnaha qoyska ee muwaadin MY ah: xaas, lammaane, caruur, waalid iyo qaraabo kale oo kugu tiirsan.
- Waa inaad bilawday inaad ku nooshahay BMI markay ahayd 31da Disembar 2020



Maxaa dhacaya haddanaan dalban?

Hadaadan dalban **31da Disembar 2020** ama **30ka Juun 2021**, waxaad noqonaysaa sharci la'aan. Tani micnaheedu waa inaad awoodin inaad shaqaysatid, codsatid gargaarada ama aad marin u hesho adeegyada kale ee daruuriga ah sida guriyeynta ama daryeel caafimaad oo bilaash ah. Waxaad u nugul tahay in lagaa saaro BMI.



Immisa ayey noqonaysaa?

Dalbadashada xaaladda deggan waa bilaash marka qorshuhu rasmi u furmo 30ka Maarso 2019. Hadaad u baahan tahay talo ku saabsan dalbashada, waa nala soo xiriiri kartaa, waxaana isku dayi doonaa inaan kugu xirno lataliye sumcad leh. Uma baahnid inaad lacag siiso qof boqolaal rodol ah si uu arjigaan adiga kuugu sameeyo. Waa nidaam fudud oo qaadan kara wax aan ka badnayn hal saac haddaad haysatid dukumiintiyada oo dhan.



Sideen u dalban karaa?

Codsiyada waxay furnaan doonaan inta u dhexeysa 29ka Maarso 2019 iyo 30 Juun 2021. Codsiyada waa in lagu sameeyaa khadka internetka ah (foomamka waraaqaha laga yaabo in la heli karo waqti dambe). Waa inaad sidoo kale awood u leedahay inaad dukumiintiga aqoonsigaaga ku masawirto talefoon Androyd ah (maaha taleefanka I-Phone). Haddii aadan haysan taleefan Androyd ah, waxaad ka heli kartaa adeegyada iskaanka sawirka laba goobood oo London ku yaal qiime dhan £14.

Goobahaasi waa:

- Hackney - 1 Hillman Street, London, E8 1DY - adeegga tagida, Talaadooyinka 1.30 - 4 galabnimo. Khamiista 9-ka - 11.30 subaxnimo
- Southwark - Xafiiska Diiwaangelinta Southwark, 34 Peckham Road, London, SE5 8QA - ballan ka samyso websaytka Golaha Southwark



5

Maxaan u baahanahay inaan tuso saan u helo 'Xaaladda Deggan'?

- Caddayn aqoonsi ansax ah: basaboora ansax ah ama kaarka aqoonsiga qaranka (kaarka BRP Ee muwaadiniinta aan ahayn MY oo ansaxa)
- sheeg dembiyadii hore ee la xukumay oo aad ku gashay BMI iyo dibaddaba
- caddaynta inaad degganayd shan sano oo xiriira BMI (ka fiiri hoos liiska caddaymaha aad keeni kartid)



'Sharci' nooc ee ah baan heli doonaa?

Hadaad degganayd si xiriira BMI 5 sano ama ka badan, waxaad xaq u yeelan doontaa 'Xaaladda Deggan' (Degganaanshaha aan Xadka Lahayn). Waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelatid Xaaladda Deggan hadaad shaqada ka fariisatay ama aad si rasmi ah u naafowday (tusaale: hadaadan shaqayn karin sababo caafimaad awgood). Hadaad degganayd si xiriira BMI in ka yar 5 sano, waxaad xaq u yeelan doontaa 'Xaaladda ka hor-Deggan' (Degganaanshaha Xadka Leh). Sharcigani wuxuu ansax yahay 5 sano. Waxaad dalban kartaa 'Xaaladda Deggan' islamarka aad ku noolaatey BMI muddo 5 sano.

Maxay micnaha 'si xiriira' tahay?


Ku noolaanshaha si xiriira BMI waxay ka dhigan tahay inaad ka maqnayn muddo ka badan 6 bilood marka laysku daro guud ahaan muddo 12 bilood. Degganaanshaha si xiriira wuu kala go'ay haddii:

- aad ku noolayd BMI in ka yar 5 sano dabadeedna aad gasho xabsi. Sharcigan maku qabanayo haddii aad ku noolayd BMI in ka badan 5 sano markaad xabsiga gashay.
- Xafiiska Hawlaha Gudaha ayaa kaa saaray ama masaafuriyay BMI

Dadkii uu saaray Xafiiska Arrimaha Gudaha xilligii u dhaxeeyay Nofembar iyo Disembar 2017 maadaama ay hurdo xumo haysay waa inay raadsadaan talo sharciyeed waayo falalka Xafiiska Arrimaha Gudaha waxaa loo arkay inay sharci darro ahaayeen. Disembar 2017.

Maxaan xaq u yeelan karaa?

Marka lagu siiyo 'Xaaladda ka hor-Deggan' ama 'Xaaladda Deggan' waxaad xaq u yeelanaysaa dhaqaalaha daryeelka iyo caawimaadda guryaha. Haddii lagu siiyay 'Xaaladda ka hor-Deggan' (Degganaanshaha Xadka Leh ee 5 sano) laga bilaabo Maajo 2019, waa inaad caddeysaa inaad tahay 'qof xaq u leh' adigoo adeegsanaya xuquuqaha 'Heshiiska' si aad u heshid daryeelka dhaqaalaha iyo caawimaadka guriyeynta. Tani micnaheedu wuxuu yahay waa inaad shaqaysid ama aad tahay iskii u shaqayste si aad u codsato daryeelka dhaqaalaha iyo caawimaadka guriyeynta.



Maxaa dhacaya haddii uu Xafiiska Arrimaha Gudaha isku dayayo inuu i saaro amai masaafuriyo?

Hadday jirto masaafurin ama amar ka saarid socota ee adiga kaa soo horjeeda markaad dalbato, dalabkaaga waa la diidi doonaa. Haddii amarku uu la xiriiro 'ka saarid maamul' sababtoo ah sida inaadan adeegsanayn xuquuqaha 'Heshiiska', dalabkaaga go'aan lagama gaarayo illaa inta 'ka saarid maamul' si guul leh rafcaan looga qaatay ama loo dhaqan geliyay.

Maxaa dhacaya haddaan haysto dambi qoran?

Dalbadayaasha waxaa looga baahan yahay inay sheegaan dambiyadii hore loogu xukumay ee BMI gudaheeda ama dibaddaba. Dalbadayaasha oo dhan waxaa laga soo hubin doonaa Kombiyuutarka Booliska Qaranka (KBQ/PNC) iyo Tasmada Digniinta (Nidaamka Xafiiska Arrimaha Gudaha). Kiisaska qaarkood waxaa loo gudbin karaa Laanta Socdaalka si ay u tixgeliso ayadooy ku xiran tahay nooca danbiyada iyo waqtiga deggenaansha. Haddaad welweshid, waa inaad raadsataa talo sharciyeed inataadan dalban.



Maxaa dhacaya haddii lay saaray ama lay masaafuriyay?

Haddii lagaa saaray ama lagaa masaafuriyay BMI, waxaad tirsan kartaa deggenaanshaha waqtigii lagu oggolaadey inaad kusso noqoto BMI oo keliya.

Dadkii uu saaray Xafiiska Arrimaha Gudaha xilligii u dhaxeeyay Nofembar iyo Disembar 2017 maadaama ay hurdo xumo haysay waa inay raadsadaan talo sharciyeed waayo falalka Xafiiska Arrimaha Gudaha waxaa loo arkay inay sharci darro ahaayeen Disembar 2017.

Ka warran haddaan horay iyo gadaal ugu safrayay inta u dhaxaysa BMI iyo waddankii asalkayga?

Haddii aadan ka maqnaan BMI guud ahaan muddo ka badan 6 bilood marka laysku daro 12 bilood gudahood, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato.

Maxaa dhacaya haddaan ka maqnaa BMI intii muddo ah?

Haddii aadan ka maqnaan BMI muddo ka badan 5 sano oo isku xigta kaddib markaad degganayd BMI muddo 5 sano ah, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato.



Sidee baan ku caddeyn karaa inaa ku noolaa BMI si xiriira?

Wax a lagu waydiin doonaa inaad keentid Lambarka Caymiska Qaranka. Dalabyadoo dhan waxaa laga hubin doonaa diiwaanka HMRC (canshuuraha iyo manfacyada). Haddii hubintaas ay muujiso inaad si xiriira u degganaayd ugu yaraan 5 sano, caddayn kale looma baahna. Sidoo kale, hadaad dalbanayso 'Xaaladda ka hor-Deggan', ayna hubinta HMRC muujiso inaad degganayd si xiriira in ka yar 5 sano, caddayn kale looma baahna.



Wixii macluumaad dheeri ah, kala xiriir Xarunta AIRE: 020 7831 4276

(Isniin Ilaa Jimce – 10.30 subaxnimo – 6da galabnimo)

info@airecentre.org

Liiska caddaynta suurtagalkaa ee degganaansho xiriira:

- ☒ Caddaynta bangiga sanadka
- ☒ Warqadda loo shayeeyaha
- ☒ P60 ama P45 tusinaya shaqada
- ☒ Warqadda iskuul, kollej ama jaamacad
- ☒ Warqadda hoyga daryeelka diiwaangashan ama kuwa kale ee guryaha bixiya
- ☒ Heshiska kirada, ayna la socoto caddayn bixinta kirada
- ☒ Biilka canshurta dawladda ama biilasha adeega sida, heshiiska telefoonka mobaylka
- ☒ Warqadda hay'ad samafal ee BMI sugaysa inaad xiriir la leedahay
- ☒ Warqadda dhaqtarka qoyska ee sugaysa diwaanka iyo ballamaha

Liiskani maahan dhammaan liiska caddaymaha. Haddii ay dhib kugu tahay helitaanka dukumiintiyada oo dhan, waa inaad raadsato talo sharciyeed.

